# Statens barnehus

## Warbixin carruurta loogu talagalay

# Waraysiyada booliska ee la fududeeyay ee ka dhacay Xarunta carruurta

Mararka qaar waxa carruurta ku dhaca waxyaalo adag oo keenaya in boolisku u baahan yahay inu waraysto ilmaha. Haddii laga shakiyo in laguu geystay ama in aad markhaati ka ahayd tacadi, xadgudub jinsiyeed ama faldembiyeedyo kale, waxaa laguugu yeedhi karaa inaad timaado Xarumaha-qarmeedka ilmaha dhiban [Statens barnehus]. Halkaas waxa boolisku kaaga qaadi donaa waraysi boolis oo la fududdeeyay. Xarunta carruurtu ma u eeka saldhig boolis, oo booliska halkaas ka shaqeeyaa ma wataan dharka booliska.

# Waa maxay waraysi boolis oo la fududeeyay?

Marka carruurta iyo dhallinyaradu qayb ka yihiin dhacdooyin faldembiyeed ah oo waaweyn, wuxuu boolisku u baahanyahay inuu ka waraysto wixii kugu dhacay iyo sida xaaladoodu tahay. Arrintan waxa loo yaqaana waraysi boolis oo la fududeeyay. Waraysigu waxa lagu xaqiijinaya caddaymaha oo waxa laga duubayaa fiidyow si aad uga maarantid inaad timaadid maxkamadda haddii kiisku maxkamad gaadho. Waxa jira xeerar ku saabsan qaabka loo qabanayo waraysi boolis oo la fududeeyay. Xeerarka ku saabsan waraysiyada booliska ee la fududeeyay waxa maamulaya Xeerka Habraaca Kiisaska Ciqaabta § 239.

# Yaa lagu waraysanayaa Xarunta carruurta?

Haddii laguugu yeedho waraysi boolis oo la fududeeyay waxay sababtu tahay in boolisku muhiim u arkaan inay kula hadlaan. Waxannu rabnaa in aanu ogaanno waxa kugu dhacay iyo sida xaaladaadu tahay. Waad nagu kalsoonaan kartaa anaga. Dhammaan dadka ka shaqeeya Xarunta carruurtu waa dad yaqaana sida loola dhaqmo carruurta iyo dhallinyarada. Maalin kasta waxannu la kulannaa carruur badan.yaqaana sida loola hadlo carruurta iyo dhallinyarada. Maalin kasta waxannu la kulannaa carruur badan.

## Yaa ku soo raacaya?

Mararka qaar waalidku carruurtooda ma u soo raaci karaan Xarunta carruurta. Waayo ma la rabo in waalidku ogaadaan in boolisku la hadlayo carruurta. Taas darteed waxa dhici karta in qof kale oo weyni kuu soo raaco Xarunta carruurta. Inta badan qofkani waa macalinkaaga ama qofka kale oo aad taqaanid. Kadib markaad timaadid Xarunta carruurta ayaa boolisku uu waalidkaaga u sheegayaa meesha aad joogtid.

## Maalinta waraysiga

Markaad timaad Xarunta carruurta waxaa boolisku keligaa kugu waraysan doonaa qol gaar ah. Haddii aanad ku hadal af-norway ama aad rabtid inaad ku hadashid luuqad kale, waxa laguu qaba-nayaa turjubaan kuu gaar ah.

Waxa kale oo lagu siinayaa cunto iyo cabitaan.

## Fiidyow

Qolka boolisku kugu waraysanayo waxa yaalla maykarafoon iyo kaamarad. Maqalka iyo muuqaalka wadahadalka waxa loo gudbinayaa qol kale. Halkaas waxa jooga dad kale oo ka shaqaynaya kiiskaaga oo la socda. Islamarkaana fiidyow ayaannu ka duubaynaa wadahadalka. Waayo waxa la rabaa inaad ka maarantid inaad maxkamad timaadid haddii la qabto kiismaxkamadeed. Fiidyowga waxa lala wadaagayaa dadka kiiskaaga ka shaqaynaya.



## Dhakhtar iyo dhakhtarka ilkaha

Mararka qaar waxa boolisku rabaa in in dhakhtar ama dhakhtar ilko ku baadho. Waayo jidhku waxaa ka muuqan karo waxyaalaha kugu dhacay iyo sida xaaladaadu tahay. Xarunta carruurta waxa noo jooga dhakhtarka ilkaha iyo dhakhtar ku baadhaya.



## Maxaa dhacaya waraysiga ka dib?

Waraysiga ka dib waxaa Xarunta carruurta iyo boolisku samayn doonaan qorshe ku saabsan waxa dhici doona. Mararka qaarna waxa ka qaybgala hay'adda daryeelka carruurta.

Carruur badan ayaa markale ku soo noqota Xarunta carruurta. Carruurta qaar ayaa laga yaabaa in falcelin kaga timaado wixii ku dhacay oo markaa raba in laga caawiyo inay ka hadlaan dareen-no adag. Waxannu halkan u joognaa in aannu ku caawinno oo kula hadalno haddii aad u baahan tahay.

POLITIET

STATENS BARNEHUS
Et tverrfaglig kompetansehus